

*Ma daryeeshaa
qof xanuunsanaya?*



*Noo ogolow in
aan adiga ku daryeelno ...*



Caawimada qaraabada waxa loogu talagalay adiga wax daryeela

Ma daryeeshaa qof buka, gaboobay ama curyaan ah – oo qaraabo, saaxiib qaaliya ama jaarkaaga ah? Ma dareemaysaa in aad kali ku tahay masuuliyadda oo dhan?

Haddii ay sidaa tahay, nala soo xidhiidh annaga oo ah dawladda hoose. Waxa aad halkan ka helaysaa caawimo, talo iyo in hawsha lagaala qaybqaato. Annaga shaqadayadu waa in aan adiga wax daryeela ku caawino – waliba in aan ku caawino ka hor inta aanay hawshu ku dhammayn ...

Caawimada qaraabadu waa qayb ka mid ah shaqada dawladda hoose. Wax lacag ahna lagaama rabo marka aad na soo booqato ama aad naga hesho caawimo, taakulo iyo talo. Xogta qofka waanu qarinaa, waxanan qof kasta u soo dhawaynaa si tixgalin mudan oo diirran.





Adigoo hore noogu yimaadda ayaa ugu wanaagsan ayaan aaminsannahay. Adiga oo kollay qalbiga ka jecel in aad daryeesho qofka buka, haddana mar ay noqotaba waxa aad u baahan doontaa caawimo. Noo kaalay oo na baro oo arag caawimada aanu bixinno, waxa laga yaabaa in ay ka badan tahay inta aad moodayso.

Soo dhawow, halkan ayaan joognaa - waxa kaliya oo aan rabnaana waa in aan wax taakulayno.

Goormaad imanaysaa?



*Si diirran ugu soo
dhawow caawimada
qaraabada ee degmada
Laxå*

Laxå kommuns anhängstödjare är:

Annelie Lindberg, telefon 0584-47 33 98 eller 070-386 76 35.

E-post: annelie.lindberg@laxa.se

Besöksadress: Frivilligcentralen, Postgatan 18, Laxå

Anne Makkonen, telefon 0584-41 13 49.

E-post: anne.makkonen@laxa.se

Besöksadress: Sociala enheten, Tivedsvägen 34, Laxå

